



URURKA LAASDHUURE

Horumarinta Waxbarashada

GUDDI-HOOSAADKA WAXBARASHADA

XUBNAHA

- Maxamuud Ibraahim Xeeef (**Gudoomiye**)
- Khadar Maxamed Aadan Jarey (**Xubin**)
- Axmed Cabdilaahi Dhabarloo (**Xubin**)
- Cabdiqani Cabdirashiid Xaamud (**Xubin**)
- Maxamuud Haaruun Axmed (**Xubin**)

SHAQADA AMA HAWSHA LOO WAKIISHAY

1. Raadinta deeqaha waxbarasho.
2. Qiimeyn & gorfeynta dhaqaalaha ururka u soo xerooday, noocyada waxbarasho ee lagu iibsano karo.
3. Diyaarinta liiska fursadaha waxbarasho ee ururku hayo.
4. Qiimeynta ardeyda heerkooda iyo noocyada waxbarasho ee ay u baahan yihiin.
5. U-qaybinta fursadaha waxbarasho ee ururku hayo ardeyda la diiwaangaliyay.
6. Diyaarinta warbixintii ardeyda iyo siday u kala heleen fursadihii waxbarasho ee ay ku tartamayeen.

FIIRO GAAR AH:

XEER-HOOSAADKA WAXBARASHADA URURKA LAASDHUURE ee soo baxay Jul/2024 sida uu dhigayo:

- Waa in ururku yeesho guddi-hoosaad u xilsaaran arrimaha waxbarashada.
- Guddi-hoosaadka waxbarashadu waxay shaqo ahaan hoos tagayaan Xidhiidhiyaha ururka.
- Xidhiidhiyaha ururku wuxuu guddi-hoosaadka waxbarashada ka caawinayaa, dhamaanba wixii hawl-fudeydin ay uga baahdaan ururka, inta ay ku gudo-jiraan shaqadooda.
- Guddi-hoosaadka waxbarashadu waxay ku shaqeynayaan Xeer-Hoosaadka Waxbarashada ururka, oo tilmaamaya habka ay shaqadooda u gudanayaan.
- Guddi-hoosaadka waxbarashadu way u madax-banaan yihiin shaqadooda, waxaana guddoominaya xubinta loo magacaabay guddoomiye.
- Guddoomiyaha guddi-hoosaadka waxbarashadu wuxuu warbixinta natiijada hawshooda, u gudbinayaa Guddoomiyaha guud ee ururka.
- Guddoomiyaha guud ee ururku, wuxuu hawl gaar ah u magacaabi karaa xubin ama xubno ka mid ah guddi-hoosaadka waxbarashada.

WAAXDA WAXBARASHADA (GUDDI-HOOSAADKA WAXBARASHADA)

- 1.** Guddidani waxay xilkooda u gudanayaan sida uu dhigayo Xeer-Hoosaadka Waxbarashada Ururka Laasdhure.
- 2.** Maalinka uu Xidhiidhiyuhu ku baahiyo whatsapp-groupka ururka Laasdhure, warqadda magacaabista guddi-hoosaadka waxbarashada,
 - a.** Waa in Gudoomiyaha guddi-hoosaadka waxbarashadu uu Xidhiidhiyaha ka helo;
 - i.** Warbixinta dhamaan ardeyda ururka u diiwaangashan,
 - ii.** Warbixinta dhamaan ardeyda waxbarashada ku jirta,
 - iii.** Warbixinta dhaqaalaha ururku hayo,
 - iv.** Username iyo Password website-ka iyo qaybaha gaarka ay u leeyihiin,
 - v.** Xogta iyo telefoonnada dhamaan xubnaha guddi-hoosaadka kula jirta,
 - vi.** Iyo dhamaan wixii hawl fudeydin ay uga baahan yihiin Xidhiidhiyaha,
 - b.** Waa in Gudoomiyaha guddi-hoosaadka waxbarashadu uu 7-cisho gudahood ku qabto, kulan ay u dhan yihiin dhamaan xubnaha guddi-hoosaadkaasi,
 - c.** Waa in kulankaasi ay ku nidaamiyaan waaxda waxbarashada, isla markaana ay ku qaybsadaan shaqooyinka waaxda waxbarashada.
 - d.** Shaqooyinka ay waaxda waxbarashadu u xil-saaran tahay waxa ka mid ah;
 - i.** Xuuraanka iyo soo helida deeqaha waxbarasho ee dalka iyo dibadaba,
 - ii.** Qiimeynta iyo gorfeynta dhaqaalaha ururka u soo xerooday, iyo noocyada waxbarasho ee lagu iibsano karo,
 - iii.** Diyaarinta liiska fursadaha waxbarasho ee waaxdu ay soo heshay,
 - iv.** Qiimeynta ardeyda heerkooda iyo noocyada waxbarasho ee ay u baahan yihiin,
 - v.** U-qaybinta fursadaha waxbarasho ee ururku hayo ardeyda la diiwaangaliyay,
 - vi.** Diyaarinta imtixaannada lagu kala saarayo ardeyda fursadaha u tartamaysa,
 - vii.** Diyaarinta warbixintii ardeyda iyo siday u kala heleen fursadihii waxbarasho ee ay ku tartamayeen,
 - viii.** Soo gelinta website-ka warbixinaha ardeyda iyo cabashooyinkooda,
 - ix.** La-socodka ardeyda waxbarashada ku jirta imtixaannadooda iyo xaadiriskooda,
 - x.** Iwm...
- 3.** Waa in gudoomiyaha waaxda waxbarashadu:
 - a.** Ardeyda waxbarashada ku jirta dhamaantood kulan is-barasho ah u qabto, isla markaana u sheego in ay si joogto ah ula socon doonaan waxbarashadooda, gaar ahaan xaadiriska ardeyga iyo imtixaannadoodaba.
 - b.** Bil kasta 30-keeda uu barnaamijka Wacyigelinta Ururka ee whatsapp-groupka uu ku soo bandhigo warbixintii ardeyda waxbarashada ku jirta iyo halka xaalkoodu marayo,
- 4.** Hadii uu xubin ka mid ah xubnaha guddi-hoosaadka waxbarashada uu hayo cabasho ama tabasho, wuxuu ku soo qorayaa foomka cabashada guddida, sida:
 - a.** Hadii xubin guddida ah uu gef ama gaabis shaqo ka tirsanayo,
 - b.** Hadii shaqadu ku badan tahay,
 - c.** Hadii shaqada ama xilka uu rabo inuu joojiyo,
 - d.** Iyo nooc kasta oo cabasho ama tabasho ah,



Ahmed koosaar Cismaan

Xidhiidhiyaha Ururka Laasdhure